

## Dhammaan dadka reer Alberta ee da'dooda tahay 12 iyo ka weyn ayaa xaq u leh qaadashada qiyaata labaad

Juun 18, 2021

---

Qof kasta oo qaatay tallaalkoodii koowaad ee mRNA (Faaysar (Pfizer) ama Moderna) ee bishii Maayo ama kahor ayaa hada qabsan kara balanta qiyaastoodi labaad ee tallaalka KOOFID-19 ee dhaqangala isla markiiba.

Alberta waxay sii wadaa hogaaminta maareynta qiyaasta labaad ee Kanada, in kabadan 25 boqolkiiba ee dadka uqalma ayaa si buuxda uqaateen tallaalka. Dawladda Alberta ayaa si xawaare leh u wadaa qiyaasaha labaad ayna u fureyso ballamo dhammaan dadka reer Alberta.

Qof kasta oo helay qiyaasta koowaad ee bishii Juun ee qiyaasta mRNA ayaa hadda ballansan kara qaadashada qiyaasta labaad hadii ay kasoo wareegtay afar toddobaad ee qaadashadiisa koowaad. Taasoo ka dhigan tahay in ka badan 983,000 oo reer Alberta ah ayaa sameyssen kara ballanta labaad oo loo marayo Adeegyada Caafimaadka Alberta (AHS), farmasiyada ka qaybgalaya iyo goobaha caafimaadka dhakhaatiirta.

### Qabsashada ballanta labaad

Dadka reer Alberta ee qaatay (tallaalka mRNA) ee Faaysar (Pfizer) ama Moderna afar toddobaad kahor ama ka badan ayaa ballansan kara qaadashadooda labaad iyagoo adeegsanaya aaladda khadka tooska ah ee internetka ee Adeegyada Caafimaadka Alberta, ka wacaya 811 ee Khadka Caafimaadka (Health Link), xafiisyada dhakhaatiirta ka qaybgalaya ama farmasiyada. Saad u hesho farmasiga kuugu dhow oo aad ballanta ugu soo dhow uga heli karto, ka hubso liiska Alberta Buluu Koros ([Alberta Blue Cross](#)).

Dadka reer Alberta ee qaatay qiyaasta koowaad ee Astarasanica (AstraZeneca) waa inay sugaan ugu yaraan sideed usbuuc kahor intaysan qabsan ballanta labaad qaadan si loo ogaado waxtarkeeda ugu fiican. Waxaa ballanta ka codsan karaa Adeegyada Caafimaadka Alberta adigoo waca 811.

Qaadashada qiyaasaha koowaad ayaa leh mudnaanta koowaad. Dadka reer Alberta aan wali helin qiyaastooda uguhoreysa ee talaalka wali ayaa ballansan kara waana lagu dhiirigalinayaa inay sidaa yeelaan. Intaa waxaa dheer, haddii aad qaadata qiyaasta koowaad oo aad iska diiwaangeliso [alberta.ca/lottery](#) ee bakhtiyaanasiibka kahor 11:59 pm bisha Juun 24, waxaad xaq u yeelan kartaa inaad ku guuleysato hal milyan doolar (One million dollars) loona marayo Alberta oo U Furan Bakhtiyaanasiibka Xagaaga (Alberta's Open for Lottery Summer).

### Aaladda khadka tooska ee loogu talagay kuwa lagu tallaalay gobolka dibadiisa

Adeegyada Caafimaadka Alberta (AHS) waxay dadka reer Alberta u fidineysaa bog cusub oo aamin ah ([new, secure web-based portal](#)) si ay uga diiwaan galiyaan cadeymaha tallaalka kasta oo KOOFID-19 ah oo ay gobolka ama dalka dibadiisa ka qaateen.

Dadka ka qaatay tallaalka gobolka ama dalka dibadiisa ayaa soo gudbin kara cadeymaha iyagoo matalaya naftooda ama caruurtooda kuwa ka yar 18 sano. Cadeymanhan ayaa Adeegyada Caafimaadka Alberta dib u eegis ugu sameyn doonta iyadoo la xaqiijinayo xogta la hayo mudo labo ilaa sedex todobaad oona laga heli doono koontada gaarka ee qofka ee Diiwaanka Caafimaadkeyga (MyHealthRecords).

## Xogta la xiriirta

- Qabso ballantaada tallaalka ([Book your vaccine appointment](#))

## Weydiimaha warbaahinta

[Jerrica Goodwin](#)

587-988-3278

Xoghayaha Saxaafadda, Xafiiska Gudoomiyaha

[Tom McMillan](#)

780-422-4905

Kaaliyaha Agaasimaha Isgaarsiinta, Caafimaadka

*Si aad u hesho ilo badan oo dowladda loo turjumay, fadlan booqo: <https://www.alberta.ca/covid-19-translated-resources.aspx>.*